Toban qodob oo ku saabsan dhawaca carruurta Australia

1. Sanad walba qiyaas ahaan **300** oo carruur Australian ah (oo jirta 0-14 sanadood) ayaa la **dilaa tira** gaaraysa **60, 000 oo qofna isbitaal ayaa loo dhigaa** dhaawac aan loola dan lahayn – badanaana waxaa loogu yeeraa shil.

2. Dhaawacu waa waxa ugu badan oo **Australia dhimashada** ku keena ilmaha jira hal ilaa afar iyo toban, waxayna gaaraan kala bar oo bar dhimashada kooxdaan ku dhacda**.**

3. Marka laga yimaada jirooyinka neefsiga la xiriira sida neefta, dhaawacu waa **waxa labaad oo keena in ilmo isbitaal la dhigo.**

4. Dhaawaca ilmaha gaaraa wuxuu wadanka ku kalifaa maal dhan **1.5 bilyan sanadii**. Keliya WA kharashka isbitaalka ku baxa oo tooska ah wuxuu ku kalifaa **14 milyan** sanadiiba.

5. dhaawaca aan ulakaca ahayni wuxuu noqdaa qiyaas ahaan **95% dhamaan dhaawaca ilmaha ee dhimashada,** marka la dhinac dhigo 5% dhaawac loola kacay, rabshad, isdil iyo dayacaad.

6. Dhaawaca dhimashada kala bar ayuu ahaa **laga soo bilaabo 1979**, hal qof ilaa laba qof maalintii. In kastoo wax fiican la qabtay, Kidsafe waxay qiyaastay ilaa 80 dhimasho iyo **20,000 isbitaal dhigid ah laga hortago** sanad walba iyadoo la hirgelinayo shuruudaha amniga.

7. Carruurta yaryar oo ka yar shan sanadood waxay khatar ugu jiraan dhaawac aan loola kicin, waxayna noqdaan qiyaas ahaan kala bar dhamaan dhaawaca dhimashada keena.

8. Dhimashada ilmaha oo aan loola qasdin wuxuu badanaa ka yimaadaa:

- **Shil gaari**
- **Lugaynta ilmaha** oo sababta in gaari ku dhaco
- **qarqid,** khaasatan carruurta yaryar oo harada dabaasha ku dhimata
- **Dab guriga qabsaday**

Isku darka afartaan sababood ayaa noqoda **75% dhamaan ilmaha dhaawaca ku dhinta.**

9. Isbitaal dhigida carruurta yaryar, oo ka yimid dhaawac aan loola qasdin badanaa wuxuu ka yimaadaa:

- **dhicid,** sida qalabka cayaarta goobta xanaanada ilmaha
- **Sumawga,** sida daawada iyo walxaha guriga lagu nadiifiyo
- **gubashada,** sida cabitaan kulul/cunto iyo biyaha tuubada kulul
- **mergashada** iyo **qaniinyada eyga**.

Carruurta da'da dugsiga, sababaha ugu badan oo isbitaal loo dhigaa waa:

- **dhicid**, sida ka dhicida qalabka cayaarta, khaasatan carruurta da'doodu tahay shan ilaa sagaal sano
- Dhaawacyo **go'id ama dilaacid**, sida go'id ka timid carruur ay waxyeeshay galaas soo dhacay oo kale
- Dhaawac **soo gaaray rakaabka gaariga**
- Dhaawaca **dadka lugta ah**.

10.Meelaha ugu badan oo carruurta korani wax ku noqdaan waa **gurigooda gudahiisa**. Carruurtu markay sii koraanba, dhaawacyada goobaha cayaaraha, isboortiga, dugsiga iyo wadooyinkeena waxay noqdaan wax caam ah. Xaqiijinta **amaanka guryaheena, wadooyinkeena iyo bulshadeenu waa waxa ugu muhiimsan** si loo amaangeliyo carruurta.

Kidsafe Western Australia
CHILD ACCIDENT PREVENTION FOUNDATION OF AUSTRALIA

fact sheet

Lix wax oo guriga lagu samaynayo oo ilmaha ka dhiga amaan

Guryeheenu sidee amaan u yihiin?

3 meelood oo afar dhaawacyada khatarta ah oo ku dhaca dhalinta waxay ka dhacaan meelaha aad u malaynayso inay ugu aaminsan yihiin – gurigooda.

Isku day iska hubinta waxyaalahan soo socda oo keena amaanka guriga:

1. **Harada dabaasha (iyo spas) oo** si fiican loo wareejiyey, xafiday, lehna albaab isxiraya.

   Sababtu waa maxay?
   Carruurtaada yaryar si degdeg ah ayey ku qarqaan. Qiyaas ahaan ilaa 20 ilmood oo ka yar shan sanadood ayaa sanad walba ku qarqa hara-biyood aan deyrnayn oo leh albaab aan si fiican loo xirin.

2. **Biyaha kulul** oo qolka xaraarada ma loo habeeyey xaraarad gaaraysa 50° celsius?.

   Sababtu waa maxay?
   Biyaha kululi waxay wax u gubaan sida dabka. Guryaha Australia waxay leeyihiin biya tuubada ka imanaya oo kulaylkoodu in ka yar hal ilmiriqsi ilmaha ku gubi karaan.

3. **Caqabadaha** sida loo sameeyo albaabka jaranjarada iyo ilaaliyaha-dabka waxay carruurta ka celiyaan khatarta.

   Sababtu waa maxay?
   Ka dhicida jaranjarada waa wax caam u dhaca sababtoo ah kor ayay ka culus yihiin badanaana madaxa ayaa wax ka gaaraan. Sababtuna waa gurboodka yaryari ma fahmaan ‘kulayl’. Waxaa soo jiita midabada dhalaalaya – sida huluca dabka – waxaana laga yaabaa inay taabtaan meel kulul iyagoo wax iska sahaminaya.

4. **Waxyallaha ilmaha ku adag** waxaa lagu rakibaa armaajada halka lagu xereeyo walxaha khatarta ah sida dawada, qalabka nadiifinta, kibriitka iyo laytariska.

   Sababtu waa maxay?
   Carruurta yaryari waxay rabaan inay wax walba ogaadaan khatartana ma fahmaan. In loo sheego “ha taaban” keligiis kuma filla inay khatar ka celiso. Alaabta khatarta ah waxaa loo baahan yahay in lagu xafido meel aanay gaarin.

5. Ku rakib **alaarmiga dabka** joogtana u tijaabi sanadiiba hal mar batterigana bedel.

   Sababtu waa maxay?
   Dabka guriga ka kaca dad badan ayuu sanad walba dilaa Australia. Carruurta yaryari khatar ayay ku jiraan maadama ay u baahan yihiin dad waaweyn oo isla markiiba wax la qabta. Alaarmiga dabka sheegaa wuxuu bixiyaa digniin waxweyn u noqon karta nolosha.

6. **Meelaha lagu cayaaro** waa in laga deyraa wadada iyo baabuur mareenka**.**

   Sababtu waa maxay?
   Baabuurta iyo carruurtu iskuma qasmaan. Carruurta yaryari kama baqaan baabuurta si sahalana kuma arki karaan dareewaladu. Ugu yaraan bil walba ilma gurbood ah ayaa waxaa dila gaari gadaal u socda.

Kidsafe waxay qiyaasaysaa haddii lixdaan wax la raaco dhamaan guryaha Australia, waxay ka caawimaysaa inay ka badbaadaan khatarta kala bar dhaawaca dhimashada carruurta ka yar shan iyo kumaankun isbitaal la dhigo sanad walba.

Qoysaska doonaya macluumaad intaas ka badan si ay gurigooda amaan uga dhigaan waxay la xiriiri karaan Kidsafe WA.

Kidsafe WA © 2007
Qayb ka mid ah ayaa la koobiyeyn karaa waxbarasho darteed. Ogolaansho ayaa looga baahan yahay si koobiyaysto xaashidaan dhamaanteed.

Macluumaad intaas ka badan ☎ (08) 9340 8509
Khadka Macluumaadka Amniga Ilmaha ☎ 1800 802 244
Khadka Macluumaadka Sunta ☎ 13 11 26

www.kidsafewa.com.au

Daabacaada xaashidaan xaqiiqada taageeray iyagoo ku faraxsan:

SGIO